

Asturnaan

Dhammaan macluumaadka aad bixisay maanta waxaa loo isticmaali doonaa in lagu caawiyo inuu shaqeeyo barnaamijka tallaalka COVID-19. Macluumaadka laga helay foomka oggolaanshaha iyo faafaahinta tallaalka walba ee la bixiyay ama la diiday ayaa waxaa diiwaangelin doonaa diiwaangeliyaha Tallaalka COVID-19 ee Wasaradda Caafimaadka

Macluumaadkan waxaa loo dhaqmi doonaa si feejigni leh si loo hubiyo inay Wasaradda Caafimaadka ay buuxiso waajibaadkeeda Xeerka Asturnaanta sharciga 2020 iyo Qodobka Asturnaanta Macluumaadka Caafimaadk 2020.

Macluumaad la aruuriyay sidii qayb nidaamka tallaalka ah ayaa loo isticmaali karaa:

- maareynta caafimaadkaaga
- in lagu ilaaliyo badbaadada adiga iyo kuwa kale
- qorsheynta iyo maalgelinta adeegyada caafimaadka
- qabashada cilmi baarista la oggolaaday
- tababarista shaqaalaha daryeelka caafimaadka
- diyaarinta iyo daabiciista tirakoobka
- horumarinta adeegyada dowladda.

Macluumaad qaar, sida macluumaadka ka falcelinta tallaalka, waxaa lala wadaagi doonaa ururada kale ee bixiya adeegyada caafimaadka sida the Centre for Adverse Reactions Monitoring.

La wadaagista shaqaalaha macluumaad

Loo shaqeeyayaaha ayaa ka codsan karaa xaqiijinta inaad qaadatay tallaalka. Waa inay iimayl ku soo diraan COVID-19.privacy@health.govt.nz si ay u codsadaan helida.

macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida Wasaaradda Caafimaadka ay u ilaalisu Macluumaadkaaga booqo websaydka Wasaradda health.govt.nz/covid-vaccine-privacy ama COVID-19.privacy@health.govt.nz

New Zealand Government

Unite
against
COVID-19

